San Diego Unified
SCHOOL DISTRICT

# ................Foomka Guud

Saxiixa Caddeynta Helitaanka Dikoomentiga/Sii Daynta Wabixinta

| Magaca Ardeyga(Magaca Awoowga, Magaca) | Magaca Waalidka (Magaca Awoowga, Magaca) | Fasal |
|---|---|---|
| Ciwaan | Telefoonka Guriga | Dugsi |
| Magaalo, Raqamka | Telefoonka Shaqada ee Waalidka iyo Qofka ilmaha masuulka ka ah | Macallin (Fasalada  X-5 oo keliya) |

## 1. AAN LOO DULQAADAN KARIN

Nidaamka Waxyaabaha aan Marna loo Dulqaadan Karin waxaa loogu talagalay inay beyada dugsiyadu ay ahaadaan kuwo nabadgelyo leh, si jawi waxbarasho oo ku habboon adiga iyo kuwa kaleba loo siiyo. Ma jiraan sabab la oggol inaad jebiso sharciyada ku faahfaahsan Qoddobka XXX. Waxaan yiqiinsanahay in ardey kasta uu fahmey ,isla markaasna, akhriyey nidaamka waxyaabaha aan marna loo dulqaadan doonin. Saxiixayganu wuxuu muujineyaa in aniga iyo ilmahayguba aan fahaney dhibaatooyinka ama natiijooyinka ka iman kara haddii ardeygu uu shuruucdas la jebiyo.

Magaca Ardeyga — Taariikh

Saxiixa Waalidka ama Qofka ilmaha masuulka ka ah — Taariikh

## 2. OGAANSHAHA NIDAAMKA CAAFIMAADKA

Sharciga Kaalifoorniya wuxuu dhigeyaa in waalidiinta ama dadka ilmaha masuulka ka ah ee ardey kasta lagu wargeliyo xuquuqda ay leeyihiin sida ku cad Qoddobka C “Xogta loo baahan yahay inay waalidiintu ogaadaan: Shuruudaha Caafimaadka, Sannad Dugsiyeedka 2011-12.” Saxiixa aad dhinac midig ku muujisey wuxuu caddeynayaa in lagugu wargeliyey xuquuqda aad leedahay

Saxiixa Waalidka ama Qofka ilmaha masuulka ka ah — Taariikh

## 3. SOO SAARISTA SAWIRADA IYO WARBAAHINTA

Wakhtigan xilli dugsiyeedka-sannadkan lagu jiro wuxuu dugsigu qaban doonaa dhacdooyin ay wararka warbaahinta iyo waxabarashadda degmadu ay rabaan inay soo bandhigaan. Waxaa dhismaha dugsiga imaneya wakiil ka socda ha'ayadaha warbaahinta si uu u sawiro, cajalado fiidiyow ah oo dhacdooyinka u duubo.

Waxaa intaas dheer, waalidiinta iyo ardeydu sawiro wey iska qaadi karaan dghacdooyinka fasalka dhexdiisa ama dugsiga agagaarkiisa lagu qabaneyo. Sawiradaas waxaa lagu soo dhejin karaa shabakada Internetka ama waa la qeybin karaa iyada oo aan dugsiga wax fasax ah laga qaadan. Ilmahaaga inuu dhacddooyinkaas ka qeyb galo qiimo badan ayey leedahay, sidaas darteed waxaa loo baahan yahay fasax waalidka marka dhacdo sawir la qaadeyo ay jirto.Waalidiinta iyo dadka ardeyda masuulka ka ah ee raba inaan ilmahooda sawir laga qaadin ama fiidiyow laga duubin waa inay dugsiga ku soo ogeysiiyaan dugsiga iyaga oo foomkan isticmaaleya. Dugsigu wuxuu si kasta ugu dadaleyaa inuu rabitaanka waalidiinta ama dadka ardeyda masuulka ka ah fuliyo. Fadlan waa inaad xusuusnaataa in qalabka telefoonka gacantu ka mid yahay sawiro iyo fiidiyowba lagu qaadi karo iyada oo aysan ogeyn ama ka war haynin macallinka, maamulaha ama shaqaalaha dugsigu.

Fadlan waxaad khaanada midigta ah ku calaamadeysaa in ilmahaagu fasax u haysto inuu ka qeybgalo. Foomkan mar kasta waad cusboneysiin kartaa adiga oo la xidhiidheya dugsiga uu ilmahaagu dhigto.

Waalidiinta ama dadka ardeyda masuulka ka ah ee aan rabin in ilmahooda marnaba  la sawiro ama fiidiyow laga duubo waa inay dugsiga ogeysiiyaan iyaga oo foomkan isticmaaleya.

**Fadlan calaamadee dhammaan meelaha ku habboon:**

- ◯ Waxaan ilmahayga u fasaxay inay warbaahintu wareysiyo, sawiro iyo fiidiyowba ka qaadi karto.
- ◯ Waxaan ilmhayaga fasax u siiyey inay waxbarashadda degmadu sawir ka qaadi karto. Sawiradaas waxaa loo isticmaali karaa shabakadaha Internetka ama buug yar oo warbixin ahaan loo soo saaro (brochure)ee dugsiyada iyo waxbarashada degmada.
- ◯ Waxaan  ilmahayga fasax u siisay Inay waxbarashadda degmadu cajalad fiidiyow ah ka duubi karto. Cajaladaas fidiyowga ah waxaa daawan kara shaqaalaha waxbarashada ama dadweynaha.
- ◯ Waxbarashada degmada ama dugsigu ilmahayga dhibco wey ku siin karaan haddii hawihii uu qabtay la soo bandhigo.
- ◯ MA RABO in ilmahayga la sawiro ama  cajalad laga duubo.

Saxiixa Waalidka ama Qofka ilmaha masuulka ka ah — Taariikh

## 4. HESHIISKA ISTICMAALKA LA OGGOL YAHAY EE NIDAAMKA ISKU XIDHIIDHSAN

Fadlan inta aadan saxiixin dikumentigan waxaad akhridaa  “Isticmaalka Tilmaamaha Nidaamka isku xidhiidhsan” ee Dugsiyada Magaaalada San Diego Qoddobka ah XX. Heshiiskan waa inaad saxiixdaa inta aan isticmaalka lagu siin nidaamka xidhiidhsan ee (SanDiNet) ee Dugsiyada Magaalada San Diego.

Waxaan fahansanahay, isla mar ahaantaasna, u hoggaansanaan doonaa shuruudaha u yaal isticmaalka SanDiNet iyo Internetka. Aniga oo ah waalidka ama qofka masuulka ka ah , waxaan ilmahayga fasax u siiyey inuu isticmaalo ISanDiNet, Internetka iyo aaladaha Xidhiidhada Ardeyda.

Magaca Ardeyga — Taariikh

Saxiixa Waalidka ama Qofka ilmaha masuulka ka ah — Taariikh

**STUDENT AND PARENT/GUARDIAN MUST SIGN ALL SECTIONS AND RETURN TO SCHOOL OFFICE**